



Barnaamijka CONNECTIONS ee ka soo kabashada ka tegista dugsiga

Ogow, Dhiirigeli, Wax bar

Ujeeddada barnaamijka CONNECTIONS waxaa weeyaan in lagu ogaado dhammaan ardeyda Dugsiyada Magaalada San Diego ee fasalada 7aad ilaa iyo 12aad ee dugsiyada iskaga tegta. CONNECTIONS waa barnaamijka SDCS ee ka soo kabashada iyo ka hortegista ardeyda dugsiyada iskaga tegta. Ardeydaas waxaa la siiyaa siddeed toddobaad oo isbeddelka waayo-aragnimada lagu barayo, taas oo ujeeddada ugu dambaysa ay tahay inay dugsiga ku soo laabtaan. Barnaamijkan waxaa la aasaasay sannadkii 1995, sababta oo ah waxaa loo baahday awood dhexe oo loogu talagalay inay caawiso ardeyda joojisay imaatinka dugsiga.

La-taliyaal wacyigelin sameeya oo ka mid ah barnaamijka CONNECTIONS ayaa loo xil saaray shaqada ah inay soo ogaadaan ardeyda dugsiyada iskaga tegtay. Marka ay baadhitaan sameynayaan waxay si aad iyo aad ah u dareensan yihiin xaasaasiyada baahida ardeyda iyo qoysaskooda. Sidaas darteed, waxyaabaha ay baadhitaankaas ku ogaadaan oo dhan waxay noqoneysaa ammuur qarsoodi ah. Baadhitaankaas marka ay sameynayaan waxay raaci doonaan hab la dejiyey oo lagu caddeeyey inuu ku habboon yahay sidii lagu ogaan lahaa ardeyda ka saaqiday nidaamka waxbarashadda.

Kedib marka la ogaado meesha ay deggan yihiin qoyska uu ardeygu ka dhashay ayey La-taliyaasha Wacyigelintu booqanayaan guriga uu ardeygu ku nool yahay, waxayna halkaas ka bilaabeeyaan habkii diiwaangelinta. Waxay ardeyga ku qoreyaan mid ka mid ah saddex sheybaadh ee waxbarashadda CONNECTIONS ee ku yaal deegaanada SDCS. Ardeyga waxaa lagu sameynayaa qiimeyn ku saabsan xaga waxbarashadda, taas oo go'aan looga gaadheyo sidii mustaqbalka loogu dhigi lahaa Xisaabta iyo Af Ingiriisiga. Waxbarashadda lagu dhigeyo barnaamijka CONNECTIONS waxaa loogu talagalay in lagu daboolo baahida waxbarashadda ee ay qabaan dhallinyarada dugsiga bannaanka ka joogtey ama ka maqnaayd.

Barnaamijku wuxuu areyda siiyaa qalabka wax lagu dhigo oo dhammeystiran iyo tabo ay ardeyda ugu diyaarineyaan inay waxbarashadooda sii wataan, iyadoo laga kaalmeynayo xaga wax dhigista iyo shucuurta ama niyada. Waxaa intaas dheer oo ay la-taliyaashu kal shaqeeyaan ardeyda waxyaabaha ay shakhisiyan iyo xirfad bulshadeedba uga baahan yihiin si jawi wanaagsan oo ay ardeydu wax ku bartaan loo helo. Qiimeyn xaga shaqooyinka xirfadaha lagu shaqeeyoo ayaa ardeyda la siiyaa iyo weliba iyagoo loo gudbiyo casharo u diyaargarowga shaqada lagu barayo. Ardeyda rabta inay shaqeyatana waxaa laga kaalmeeeyaa xaga shaqo la raadinta.

Shaqaalaha barnaamijka CONNECTIONS waxay aaminsan yihiin inay ardeydu garanayaan qiimaha ay waxbarashaddu leedahay iyo inay dugsiga uga baxaan marka la siin waayo taageerada ay u baahan yihiin si ay waxbarashadda ugu guuleystaan. Taageero la'aantaasu waxay ka timaadaa ilo badan oo kala duwan, waxaana ka mid ah dugsiga ardeyga iyo gurigooda. Haddii aad la kulanto ama aad teqaano ardey aan dugsi ku jirin, isla mar ahaantaasna, raba inuu dugsiga ku soo laabto, hase ahaatee ay dhibaato ka haysato sidii uu dugsiga ugu soo laaban lahaa, fadlan waxaad la soo xidhiidhaa barnaamijka CONNECTIONS.

Barnaamijka CONNECTIONS wuxuu hada ku yaalaa Xarunta Waalidiinta ee la yidhaahdo Harold V. Ballard Center (oo horey u ahaan jirtey Dugsiga Hoose ee Fremont.)

Warbixinada kala xidhiidh: CONNECTIONS Drop Out Recovery Program: (619) 574-5035

Su'aalaha Warbaahinta: (619) 725-5578

www.sandi.net

La naqtiimay 3/9/06

San Diego City Schools (SDCS) waa kan labaad ee ugu weyn waxbarashadda degmooyinka ee California. Waxay u adeegtaa in ka badan 136,000 oo ardey. Waxay leedahay in ka badan 202 oo waxyaabaha waxbarashadda sahla ah, iyo in ka badan 14,500 jagooyin shaqo-buuxda u dhigma (oo meteleya 15,800 oo shaqaale ah.) SDCS waxay ahmiyada saartaa inay hagaajiyaan xirfadaha waxbarashadda aasaasiga ah ee xaga akhriska, qoraalka iyo xisaabta. Waxbarashadda degmadu waxay u heellan tahay inay taageero dugsiyada iyo inay kobciso jawiga waxbarashadda ee fasalka dhexdiisa ah, iyadoo adeegsanaysa qalab casri ah iyo taageerooyinka ay ka helayso hawlgalka waalidka, macallinka, iyo jaaliyada ee dhinacyada waxbarashadda. **SOMALI VERSION: CONNECTIONS Drop Out Recovery Program**

OO KOOBAN

UJEEDDADA BAYAANKA

Waa in la ogaado ardey kasta dhigta dugsiga dhexe ama sare oo aan dugsi ugu dhiganin, isla mar ahaantaasna, raba inuu dugsiga ku soo laabto si uu u noqdo qof wax bartay oo guul gaadha.

❖ Xidhiidhka aan la sameynayno ardeyda iyo waalidiinta barnaamijka ku hawlan, waxaan ogaanay inay jiraan waxyaabo badan oo sabab u ah inay ardeydu dugsiga iskaga tegaan. Ardeyda iskaga tegta dugsiga waa kuwo inta badan:

- Dareensan in shaqaalaha dugsiga uusan rabin
- Hal sanno ama in ka badan ka hooseeya heerkii looga baahnaa
- Aan fikrad inaba ka haysanin qorsheyaasha xirfadaha shaqo
- Dadka waaweyn dhiirigeli yar ka helo
- Ka soo jeeda guri uu hal waalid oo keliya joogo
- Akhlaaqdiisa dugsiga ay liidato